Education
Centre for Education Statistics & Evaluation

Somali

Tell Them From Me parent survey
Ra'yi-baarista Waalidka ee *Ayaga Iigu Sheega*
Frequently Asked Questions (parents and carers)
Su'aalaha badanaa la isweydiiyo (waalidiinta iyo daryeelayaash)

Xarunta Tirakoobka Waxbarashada iyo Qiimeynta (CESE)

1. Waa maxay ka-qayb-qaatayaasha Barashada ra'yi-baarista waalidiinta?

Ka-qayb-qaatayaasha Barashada (Partners in Learning) ra'yi-baarista waalidka waa qayb ka mid ah *Ayaga Iigu Sheega (Tell Them From Me)* goobta ra'yi-baarista ee howlgelinta ardayga. Ra'yi-baarista waalidku waxay kaa caawinaysaa in la caddeeyo oo la xoojiyo xidhiidhka muhiimka ah ee ka-dhexeeya waalidka iyo dugsiga.

Ra'yi-baarista waxaa loogu talagalay in lagu cabiro, qiimeeyo lana soo-sheego aragtida ka imaanaysa fikradda waalidka marka loo eego dugsiga iyo heerarka nidaamka. Ujeedada laga leeyahay ra'yi-baaristan NSW waxay ku salaysan tahay fayoobidda, howlgelinta ardayga, iyo waxqabadyada wax-baridda ee dhabta ah.

2. Su'aal noocee ah ayaa ra'yi-baaristu weydiin doontaa?

Su'aalaha ra'yi-baarista waxay ujeedadoodu tahay fahamka aragtida waalidiinta ee waayo-aragnimada ilmahooda ee dugsiga, oo ay ka mid yihiin baridda, wada-hadalka iyo taageerada dugsiga ee waxbarashada iyo anshaxa. Ra'yi-baarista waxaa sidoo kale looga golleeyahay in la fahmo aragtida waalidiinta ee ku saabsan howlaha iyo waxqabadka guriga ee la xiriirta waxbarashada ilmahooda.

Ra'yi-baaristu waxay waalidiinta weydiin doontaa su'aalaha ku saabsan:

Waalidiinta oo soo dhoweyn dareema	Waalidiinta waa la wargeliyaa	Waalidiintu waxay taageeraan barashada guriga
Dugsigu waxay taageeraa anshaxa habboon	Ammaanka	Ka-mid-noqoshada
Doorashooyinka wada-hadalka	Ka-qaybgalka waalidiinta ee dugsiga	Dugsigu wuxuu taageeraa barashada

3. Sidee dugsiyada loo xushay inay ka qaybqaataan?

Ra'yi-baaristu waxay u furan tahay dhammaan dugsiyada dawladda NSW iyada oo aan wax kharash ah u lahayn. Dugsigaagu ayaa go'aansaday inuu ka qaybqaato.

4. Sidee ayaa ilmahaygu uga faa'iideysanayaa ka-qayb qaadashada ra'yi-baaristan?

Ra'yi-baarista waalidka waxay maamulayaasha iyo hogaamiyeyaasha dugsiga siisaa aragtida waalidiinta oo ku saabsan dugsigooda iyo sidoo kale barashada guriga ka jirta. Wada-hadalka ka dhaxeeya waalidiinta iyo shaqaalaha, howlaha iyo waxqabadyada guriga, iyo aragtida waalidka ee ku saabsan taageerada dugsiga ee barashada iyo anshaxa waxay ka caawisaa abuuridda sawir sax ah oo waqtiyeysan oo dugsiyadu u isticmaali karaan hagaajin wax ku ool ah.

Xogta laga soo ururiyey jawaabaha ra'yi-baarista ayaa si degdeg ah loogu soo ururiyey warbixinnada madaxda dugsiyada. Maamulayaashu waxay markaa isticmaali karaan macluumaadkan si ay uga caawiso inay ogaadaan arrimaha soo-baxaya ayna wax u qorsheeyaan horumarinta dugsiga.

5. Sidee ayaa ra'yi-baarista waalidku ula xiriirtaa ra'yi-baarista ardayga?

Ra'yi-baarista waalidku waa qayb kaamilaysa *Tell Them From Me* Ayaga Iiga Sheega ra'yi-baarista ardayga oo laga yaabo in ilmahaaga laga codsaday inuu dhammaystiro. Ra'yi-baarisyadan waxaa loo bixiyaa (ayagoo ay la socdaan ra'yi-baarista baraha) si loo hubiyo in dugsiyadu ay la qabsan karaan aragtida ardayda, barayaasha iyo waalidiinta.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mid kasta oo ka mid ah ra'yi-baarisyada, ka eeg bogga ama website-ka ra'yi-baarista: http://surveys.cese.nsw.gov.au/

6. Maxaan u baahanahay inaan sameeyo si aan uga qaybgalo ra'yi-baarista?

Ra'yi-baaristu waxay caadi ahaan qaadataa 15 daqiiqo, waxaana lagu sameeyaa dhammaanteed online iyada oo loo marayo website amaan ah oo ay ka shaqeeyaan sameeyeyaasha ra'yi-baarista, *The Learning Bar.* Waxaad ku dhameystiri kartaa ra'yi-baarisyada kombiyuutarada desktopka ah, laptops, ipads, tablets iyo smartphones. Waxaa lagu siin doonaa xiriirka si aad ugu dhamaystirto ra'yi-baarista guriga ama dugsigaaga ayaa laga yaabaa inuu kombiyuutar kuu diyaariyo si aad u dhamaystirto ra'yi-baarista inta lagu jiro saacadaha dugsiga. Xiriirkan waxaa kuu qaybin doonaa dugsigaaga inta lagu jiro Teeramka 3aad.

7. Miyaan u baahanahay inaan ka qaybqaato?

Maya, ka-qaybgalka ra'yi-baarista waa ikhtiyaari. Inkastoo jawaabahaaga aad loo qadarinayo, haddana inta ra'yi-baarista lagu jiro, aad dareento raaxo la'aan, waxaad joojin kartaa ra'yi-baarista waqti kasta. Su'aalaha badankood ee ra'yi-baarista ayaa laga boodi karaa.

8. Miyuu dugsigu jawaabahayga ka ogaan karaa aniga ama ilmahayga?

Shaqaalaha dugsiyadu ma awoodi doonaan inay ka aqoonsadaan waalidiinta ama ardayda shakhsi ahaan jawaabaha waalidka. Xeerarka xakamaynta xogta waxaa lagu dabaqaa qalabka warbixinta dugsiga halkaas oo ay ka yar yihiin shan jawaabood.

9. Qiimeyn noocee ah ayaa lagu sameyn doonaa xogta ra'yi-baarista?

Isla markii ra'yi-baarista la dhammeeyo, warbixinnada waa la diyaariyaa, kiisaska intooda badan waxay heli kara dugsiyada saddex maalmood shaqo gudahood. Madaxda dugsiga waxay isticmaali karaan xogta si ay si fiican ugu fahmaan waayo aragnimada iyo aragtida waalidiinta ee dugsigooda.

Wasaaradda Waxbarashada ee NSW, iyada oo loo marayo Xarunta Tirakoobka Waxbarashada iyo Qiimeynta (Centre for Education Statistics and Evaluation (CESE)), waxay qaban doontaa falanqaynta xogta ra'yi-baarista oo dowlad-goboleedka oo dhan ah ee la-xiriirta xogta ardayga ee jirta oo wasaaraddu hayso, oo ay ka mid tahay xogta waxqabadka. Natiijooyinku waxay ka caawin doonaan dhammaan dugsiyada inay si fiican u fahmaan xiriirka ka dhexeeya waalidiinta iyo howlgelinta ardayda, samaqabka ardayda, barista wax-ku-oolka ah iyo barashada ardayda.

Natiijooyinka ka soo baxa falanqaynta CESE ee xogtan ayaa sidoo kale ka caawin doonta bareyaasha iyo maamulayaasha inay ka wada hadlaan waxay yihiin shaqooyinka si loo horumariyo natiijooyinka ardayga. Tani waxay taageertaa diirad-saarista joogtada ah ee wasaaradda oo ku aadan tayada baridda iyo hoggaaminta. Xogta waa loo sii-hayn doonaa falanqaynta mustaqbalka si ay nooga caawiso inaan si fiican u fahanno dabeecada howlgelinta iyo fayoobidda ardayga ee wakhtiga jira.

10. Goorma ayey dhici doontaa in Ka-qaybgalayaasha ra'yi-baarista Barashada?

Ra'yi-baarista waxaa lagu qaban doonaa dhammaan dugsiyada ka-qaybgalaya inta u dhaxaysa bartamaha Teeramka 3aad iyo toddobaadyada ugu horeeya ee Teeramka 4aad. Guud ahaan laga bilaabo Asbuuca 6aad, Teeramka 3aad ilaa Asbuuca 2aad, Teeramka 4aad.

Waa maxay CESE?

Xarunta Tirakoobka iyo Qiimeynta Waxbarashada (CESE) waa qayb ka mid ah Wasaaradda Waxbarashada.

CESE waxaa loo sameeyay si loo wanaajiyo waxtarka, iyo masuuliyadda waxbarashada ee New South Wales. CESE waxay aqoonsan doontaa lana wadaagi doontaa wixii shaqooyin ah, ee abuurista fursado cusub oo lagu hagaajinayo baridda iyo barashada ee dhammaan waxbarashada oo dhan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CESE waxaa laga heli karaa: www.cese.nsw.gov.au

Waa maxay *The Learning Bar*?

The Learning Bar waa shirkad waxbarasho ee Canada ah oo ku takhasusay ra'yi-baarisyada dugsiyada ee ardayda dugsiyada hoose iyo dugsiyada sare labadaba. Ra'yi-baaristeeda, *Tell Them From Me*, waa ra'yi-baarista dugsiga qaraneed oo ugu weyn Canada, oo laga isticmaalo sagaal ka mid ah tobanka gobol ee Canada. In ka badan 6,300 dugsi iyo 5.4 milyan oo arday ayaa ka qaybqaatay ra'yi-baaristan. Dugsiyada Australia waxay ka qaybqaadanayeen ra'yi-baarista *Tell Them From Me* ilaa sannadka 2012.

The Learning Bar waxaa hogaaminaya Dr J Douglas Willms. Dr Willms waa Madax-weynaha Akademiyada Waxbarashada ee Caalamiga ah, wuxuu Xubin ka tirsan Akademiyada Waxbarashada Qaranka ee Maraykanka iyo Saaxiib Royal Society of Canada. Wuxuu dhawaan qabtay Guddoomiyaha Tier 1 Canada Research Chair ee Akhris-qoraalka iyo Horumarka Aadanaha mudo 14 sano ah. Dr Willms wuxuu ka qaataykaalin hogaamin xagga horumarinta su'aalaha Barnaamijka OECD ee Qiimaynta Ardayda Caalamiga ah (Programme for International Student Assessment – PISA).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan *The Learning Bar* waxaa laga heli karaa: www.thelearningbar.com

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ra'yi-baarista waalidka, fadlan kala xiriir CESE adiga oo isticmaalaya email: **TTFM@det.nsw.edu.au** ama telefoon **1300 131 499**.